

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **24/05/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- MOHAMED OSMAN HERSI, Ina Xulbado Guuleed Jaamac, Somali ah, Ku Dhashay: Gaalkacyo, Sanadkii: 01/01/1945, Sita: Somali Passport, Lr. S00028193, Kana soo baxay baxday waaxda socdaalka iyo jinsiyadaha Soomaaliya.

LA WAKIISHE:- ABDINUR OSMAN HERSI, Ina Xaawo Siciid Hayl, Somali ah, Ku Dhashay: Galisoor, Sanadkii: 28/02/1978, Degan H/Wadaag, Sita: National ID Lr. 74517004461.

TILMAAMAHA GURIGA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(H/Wadaag)**, Cabirka: **(20X15)-M**, Looto No: **820-H**, W.M.L: **(Rep.61402/2016)**, Tr. 09/10/2016, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Una Saxiixay Dr. Siciid Cali Cosoble

SOOHDINTA GURIGA

Bari: **Jid**, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: dhul dad

B- Aniga oo ah **MOHAMED OSMAN HERSI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaalkeey **ABDINUR OSMAN HERSI** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan guriga Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in gurigaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dayactiri karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ABDINUR OSMAN HERSI** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga gurigaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.


T- Aniga oo ah **ABDINUR OSMAN HERSI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **MOHAMED OSMAN HERSI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

MOHAMED OSMAN HERSI



1- BILE MOHAMED MAHAMUD



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

ABDINUR OSMAN HERSI



2- ABDIRAHMAN ABDULLAHI ABDI



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1599/T.P.N/25, Tr. 24/05/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- MOHAMED OSMAN HERSI** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- ABDINUR OSMAN HERSI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

By: C/qani





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:-(HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNCIPAAL AH)
Muqdisho maanta oo ay tariikhdu tahay 09/10/2016 Anigoo ah, Dr.Saciid Cali Cosoble, ahna Notayaha Muqdisho, Xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa Xafiiska iigu yimid iyagoo hishiis ah, mudanayaasha hoos ku cad ina weydiistay in aan u kala qoro hishiiskooda hoos ku cad:-

1-)Aniga oo ah Daahir Jaamac Cuuke Xuseen, Waxaan Heshiiskan ku cadeynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyay kuna wareejiyey Maxamed Cusmaan Xirsi Maxamuud Dhulkeyga Banaan ee ku yaal Xamar Degmada (H/wadaag), oo aan ku milkiyay W.M.L.61124/2016, Tr,10/09/2016, Kana Soo Baxdey Nootaayo Muqdisho uuna Saxiixay Dr,Saciid Cali Cosoble, Dhulkaan oo Cabirkiisu dhan yahay (20X15.M), Lotto Lr. (820-H) Soohdimihiisuna kala yihiin Bari waxaa ka mara Jid, inta kalane waxaa ka xiga dhul dad, Lehna Nullo Oste Ku Lifaan Qoraalkan, Wuxuuna Wakiilka iibsadaha Dhulkaan iiga iibsaday lacag dhan USD. 19,500/S. (Toban iyo Sagaal Kun iyo Shan Boqol oo Dollar oo aan lacagtaas wada qaatay), Waxaan kale oo aan caddeynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo waxkasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal millkiyadeed ah ee laxiriira isla dhulkaan. Waxii taariikhda sare ka bilowdana dhulkaan millkiyadiisa Faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa Canshuureedba waxuu u wareegay (Maxamed Cusmaan Xirsi Maxamuud).

2-)Aniga oo ah C/risaaq Maxamed Diini, Ahna Wakiilka iibsadaha Lagu Magacaabo Maxamed Cusmaan Xirsi Maxamuud, Somali ah, Ku dhashay G/kacyo, Sanadkii 1942, Kii, Degan "Xamar" Hooyadiisna la yiraahdo Xulbado Guuleed Jaamac, Waxaan Heshiiskan dhankeyga ku Cadeynayaa in Daahir Jaamac Cuuke Xuseen, igu wareejiyay dhulkaan afartiisa dhinac ee kala duwan oo waxba dhimaneyn lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan u gudoomay iibsadaha una saxiixay kaalintiisa Heshiiskan.

3-)Aniga oo kala ah 1-)C/laahi Faarax Diiriye "Galeyr" 2-)Axmed Ismaaciil Barre, Waxaa Heshiiskan dhankeena ku caddeynaynaa in aan markaati iyo goob joogba ka nahay Beecaan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA

Daahir Jaamac Cuuke Xuseen.

Daahir Jaamac Cuuke Xuseen

SAXIIXYADA MARQAATIYAASHA

1-)C/laahi Faarax Diiriye "Galeyr"

SAXIIXA WAK/ IIBSADAHAA

C/risaaq Maxamed Diini.

C/RISAAQ

2-)Axmed Ismaaciil Barre.

Rep 61402/2016

(CADDAYNTA XAFIISKA NOOTAAYAHA)

Tr. 09/10/2016.

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr.Saciid Cali Cosoble waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) Daahir Jaamac Cuuke Xuseen, Somali ah, Ku dhashay G/kacyo, Sanadkii 1959, Kii, Hooyadiisna la yiraahdo Xaliimo Xasan Khayre, oo sita W.A.L.000104904, Ahna (iska iibiye). 2-) C/risaaq Maxamed Diini, Degan "Xamar" Ahna (Wakiilka iibsadaha), iyo waliba Labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan. Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadas ayleeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska, iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

By: Madaxey



NOTAAYAHA=
(Dr. Saciid Cali Cosoble)



FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 31/05/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **CABDINUUR CISMAN XERSI** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1599/T.P.N/25, Tr. 24/05/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	CABDINUUR CISMAN XERSI
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X15
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada H/wadaag
Lotto Lambar	820-H
W.M.L	61402/2016, Tr. 09/10/2016 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Wakaalada	24/05/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **CABDINUUR CISMAN XERSI**, Leh Tel No. **0612006028**, Degan **H/Wadaag** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

CABDINUUR CISMAN XERSI